

LD العالم اطباء منظمة LÄKARE I VÄRLDEN MEDICI DEL MON  
MÉDICOS DO MUNDO MÉDICOS DEL MUNDO 世界の医療団  
世界医生组织 DOCTORS OF THE WORLD منظمة أطباء العالم  
DOKTERS VAN DE WERELD MÉDICOS DO MUNDO  
के डॉक्टर MÉDECINS DU MONDE 世界医生组织 DOCTORS  
I DEL MONDO ΓΙΑΤΡΟΙ ΤΟΥ ΚΟΣΜΟΥ DOKTERS VAN DE  
ELT दुनिया के डॉक्टर MÉDECINS DU MONDE 世界医生组织 DO

In association with



BritishRedCross



# TALLAALKA CORONAVIRUS (COVID-19) ENGLAND, SCOTLAND IYO WALES

Tallaalada coronavirus (COVID-19) waa kuwa ammaan ah waxtarna leh. Wuxuu sida ugu wanaagsan kaaga ilaalinayaa coronavirus.

Version 1 (Waxaa la cusbooneysiiyay 03.03.2021)

SOMALI | SOMALI



## Tusmada

YAA QAADAN KARA TALLAALKA COVID-19? .....	2
SIDA LOO BIXIYO TALLAALKA COVID-19 .....	4
SIDA LAGU HELO TALLAALKA COVID-19 .....	4
AMMAAN MA LEEYIHIIN TALLAALADA COVID-19? .....	7
WAXTAR INTEE LA'EG AYUU LEEYAHYA TALLAALKA COVID-19? .....	7
WAXYEELOOYINKA TALLAALKA COVID-19 .....	8
WAXYABAHA LAGA SAMEEYAY TALLAALKA COVID-19 .....	8
MACLUUMAAD DHEERAAD AH .....	9

## YAA QAADAN KARA TALLAALKA COVID-19?

Tallaalada COVID-19 ee ay bixiso NHS waxaa si bilaash ah ku heli doona dhammaan dadka wayeelka ah ee ku nool England, Scotland iyo Wales, iyadoon loo eegin xaalada deganaanshaha. Tani waxaa ku jira dadka aan xaqa u lahayn inay heelaan dheefaha dadweynaha (NRPF). Waqti xaadirkan NHS waxay tallaalka COVID-19 siisaa dadka halista ugu badan ugu jira inuu ku dhaco coronavirus.

Tallaalada waxaa lagu bixiyaa farmashiyada qaarkood, goobaha tallaalka ee deegaanka ee ay maamulaan GPs (Dhakhaatiirta Caafimaad ee Qoyska) iyo guud ahaan goobaha talaalka.

NHS waxay ku tallaali doontaa dadka qaab ku saleysan khatarta caafimaad, inta badan waxay ku saleysan tahay xaaladaha caafimaad ee horay u jiray iyo kooxaha da'aadka laga soo bilaabo duqeyda ilaa iyo dhalinta. Dadka qaarkood ayaa halis aad u badan ugu jira inay dhibaatooyin daran kala kulmaan COVID-19 marka loo eego kuwa kale.

Waxaa la siiyaa:

- dadka 55 sano jirka ah ama ka wayn
- dadka halista badan ugu jira coronavirus (kuwa leh xaaladaha caafimaad ee raaga)
- dadka halista badan ugu jira inay dhibaatooyin kala kulmaan caronavirus iyada oo ay ugu wacan tahay dhibaatooyin caafimaad oo horay u jiray (sida COPD, neefta, dhibaatooyinka wadnaha, cudurka kilyaha ama beerka, sonkorowga iyo dhibaatooyinka kale ee caafimaad ee muddada dheer)
- dadka ku nool ama ka shaqeeya guryaha daryeelka
- shaqaalaha caafimaadka ama daryeelka bulshada
- dadka leh naafonimada waxbarashada
- dadka xaqa u leh inay helaan Gunnada Dadka Daryeelka Bixiya

Dawlada UK waxay ka shaqeenaysaa inay dhammaan dadka waayeelka ah siiso kuuraha koowaad ee tallaalkooda dhamaadka bisha Luulyo.

**England:** [Akhriso warbixinta ugu danbeysay ee tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay dadka wayeelka ah](#)

**Scotland:** [Akhriso warbixinta ugu danbeysay ee tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay dadka wayeelka ah](#)

**Wales:** [Akhriso warbixinta ugu danbeysay ee ku saabsan tallaalka COVID-19](#)

## **Haddi aadan wali xaq u lahayn**

Sug in lagula soo xiriir. NHS ayaa ku soo ogeysiin doonta marka la gaaro waqtigaaga aad qaadan lahayd tallaalka.

**England:** [Akhriso warbixinta ugu danbeysay ee ku saabsan xaq u yeelashada iyo qeybinta tallaalka COVID-19](#)

## **Tallaalka qof walba miyuu qaadan karaa?**

Ma jiro wax caddeynaya in tallaalka COVID-19 uusan kuu wanaagsaneyn haddii aad uur leedahay. Balse caddeyn dheeraad ah ayaa loo baahan yahay kahor inta aan si joogta ah lagu siinin.

Gudiga Wadajirka ah ee Talaallaalada ayaa cusbooneysiisay taladooda si laguugu soo jeediyo inaad tixgeliso inaad tallaalka qaadato haddii aad uur leedahay oo:

- aad halis badan ugu jirto inuu kugu dhaco coronavirus goobtaada shaqo aawadeed
- aad xaalad caafimaad qabto waxay ka dhigan tahay inaad halis badan ugu jirto dhibaatooyin daran oo kaa soo gaara coronavirus

Uma baahnid inaad iska ilaaliso inaad uur yeelato tallaalka kadib Tallaalada ma wataan fayras nool oo kuguma ridi karaan COVID-19 adiga iyo cunugaaga. Ma lahan wax caddeyn ah in tallaalada COVID-19 ay sameyn ku yeelan doonaan dhalmada.

Waad qaadan kartaa tallaalka COVID-19 haddii aad ilmo nuujineyso. La hadal xirfadle caafimaad kahor inta aadan tallaalka qaadanin. Waxay kaala hadli doonaan dheefaha iyo halista uu leeyahay.

**England:** [Akhriso talabixinta tallaalka COVID-19 ee ugu danbeysay haddii aad uur leedahay, aad uur yeelan doonto ama aad naas nuujineyso.](#)

**Scotland:** [Akhriso talabixinta tallaalka COVID-19 ee ugu danbeysay haddii aad uur leedahay, aad uur yeelan doonto ama aad naas nuujineyso](#)

**Wales:** [Akhriso talabixinta tallaalka COVID-19 ee ugu danbeysay haddii aad uur leedahay, aad uur yeelan doonto ama aad naas nuujineyso](#)

Waa inaad qaadanin tallaalka COVID-19 haddii aad horay waligaa xasaasiyad xun ugu yeelatay (ay kamid tahay jirto xasaasiyada daran) kuure hore oo isla tallaalkaas ah ama wax ku jiro tallaalka.

Dadka qaba caburinta awooda difaaca jirka iyo caabuqa HIV (iyada oo aan loo eegin tirada CD4) waa in la siiyaa tallaalka.

Dadka leh xinjirowga dhiigga ama xanuunada dhiig baxa ayaa wali qaadan kara tallaalka balse waxay u baahan karaan inay la tashadaan daryeel bixiyahooda si loo hubiyo in la qaato xilliga saxda ah inta daawada soocoto.

## **SIDA LOO BIXIYO TALLAALKA COVID-19**

Tallaalada COVID-19 waxaa dhammaan loo qaataa cirbad ahaan taas oo garabka la iskaga duro. Waxaa loo qaataa labo kuure ahaan. Waxaad qaadan doontaa kuuraha labaad saddex ilaa iyo 12 toddobaad kadib markaad qaadato kuuraha koowaad.

Markaad qaadato tallaalkaaga koowaad waxaa lagu siin doonaa kaar yar oo ay ku qoran tahay faahfaahinta tallaalka. Waa inaad ilaaliso kaarkan. Haddii ay dhacdo inaad kuurahaaga labaad ee tallaalka ka qaadato xarun tallaal oo kale kaarka wuxuu kaa caawin doonaa inaad hesho tallaalka saxda ah.

## **SIDA LAGU HELO TALLAALKA COVID-19**

Tallaalada COVID-19 ee ay bixiso NHS waxaa si bilaash ah ku heli doona dhammaan dadka wayeelka ah ee ku nool UK, iyadoon loo eegin xaalada deganaanshaha.

Way fududahay in la helo tallaalka haddii aad ka diiwangashan tahay Dhakhtarka Caafimaad ee Qoyska (GP) Tani waxay xaqiijin doontaa inaad yeelato lambarka NHS oo aad ballan qabsato marka aad xaq u yeelato tallaalka (iyada oo ku saleysan da' ama xaalad caafimaad). Inaad iska diiwaangeliso GP waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaad heli karto adeegyada caafimaadka iyo daryeelka ee kale.

GP-ga waa dhakhtarka caafimaad ee qoyska. Gudaha England, Scotland iyo Wales, qof kasta ayaa iska diiwaangelin karo GP kadibna ku heli karo adeegyada daryeelka aasaasiga ah si bilaasha ah, iyadoon loo eegin xaalada deganaanshaha.

Haddii aad haddadan ka diiwaangashaneyn GP waa inaad deegaankaaga ka raadsato GP oo aad haddadan iska diiwaangeliso, xitaa haddii aadan wali xaq u lahayn tallaalka. Waxaad heli kartaa GP u dhaw meesha aad ku nooshahay adiga oo isticmaalaya bogga intarnetka NHS ee England, Scotland ama Wales, ama waxaad wici kartaa GP-ga deegaankaaga waxaadna ka codsan kartaa in bukaan ahaan lagu diiwaangeliyo.

Xafiisyada GP waxay diiwaangelin karaan oo keliya dadka deegaankooda. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan xadka xafiiska GP-ga waxaad u baahan doontaa inaad raadsato GP kale oo u dhaw meesha aad ku nooshahay.

Waxaad u baahan doontaa inaad foom buuxiso si aad iskaga diiwaangeliso GP. Waxaad eegi kartaa bogga intarnetka ee xafiiska GP-ga si aad u ogaato haddii aad onleen ahaan isku diiwaaneglin karto. Waa inaad dalbato inaad isku diiwaangeliso sida bukaan joogta ah (ma ahan bukaan muddo gaaban ahaan). Waxaad ka codsan kartaa xafiiska GP-ga inay kaa caawiyaan buuxinta foomka hadaad u baahato.

## **Miyaan u baahanahay dukumiintiyo si aan iskaga diiwaangeliyo GP?**

Xafiisyada qaarkood ayaa kaa dalban kara inaad bixiso dukumiintiyo, sida caddeynta cinwaanka, caddeynta aqoonsiga ama caddeynta xaalada deganaanshaha, ama lambarka NHS si aad isku diiwaangeliso, balse waa inaysan kuu diidin inay ku diiwaangeliyaan haddi aadan heysanin.

Haddii aadan keeni karin dukumiintiyadan, waa inaad sheegtaa inaad heysanin dukumiintiyadan balse aad ku nooshahay xadka xafiiska guduhiisa aadna jeclaan lahayn inaad iskaga diiwaangeliso GP-ga bukaan ahaan.

Haddii aad wax dhibaatooyin ah la kulanto marka aad iska diiwaangelineyso GP, dhigaaladan soo socda ayaa ku caawin kara. Haddii aad onleen ahaan isku diiwaangelineyso oo dukumiintiyadu lagu weydiyo, waxaad iimayl ahaan dhigaalada ugu diri kartaa xafiiska GP-ga.

- **NHS-ta England** waxay soo saartay kaarar jaalle ah si looga caawiyo dadka aan dukumiintiyada heysanin inay iska diiwaangeliyaan GP jooga England. Waxaad tusi kartaa kaarka karaaniga GP-ga markaad u baxdo inaad isa soo diiwaangeliso. Waxaad kaarka jaallaha ah ka heli kartaa hay'adaha samafalka ee deegaanka, goobaha lagu qeybiyo cuntooyinka, hay'ada Healthwatch ee deegaankaaga ama hay'ada Doctors of the World.
- **Dawlada Scotland** waxay tilmaam siisay GP-yada jooga Scotland taas oo dhigeysa: "Wax dukumiintiyadu ah looma baahna si la iskaga diiwaangeliyo GP. Inuu awoodi waayo bukaan inuu keeno aqoonsi ama caddeynta cinwaanka looma tixgeliyo sababo macquul ah oo loogu diidi karo ama looga dib dhigi karo diiwaangelinta bukaan."
- **Ururka Caafimaadka ee British** tilmaamta ay siiyeen dhakhaatiirta jooga England, Scotland, Wales iyo Northern Ireland waxay dhigeysaa "Haddii bukaan uusa awoodin inuu bixiyo dukumiintiyada sharciga ah, ma ahan sababo macquul ah oo loogu diidi karo in la diiwaangeliyo".

Haddii xafiiska GP-ga uu diiday inuu ku diiwaangeliyo, bukaanada England waxay wici karaan 0300 311 2233. Bukaanada Scotland iyo Wales waa inay la xiriiraan Guddiga Caafimaadka ee deegaankooda. Bukaanada waxay sidoo kale kala xiriiri karaan Doctors of the World lambarka 0808 1647 686 (taleefon lambar bilaasha ah) si looga caawiyo iska diiwaangelinta GP.

## Haddii aad hooy la'aan tahay

Waxaad iska diiwaangelin kartaa GP haddii aadan lahayn cinwaan guri oo toos ah. Waa inaad u sharaxdaa xafiiska GP inaad lahayn cinwaan guri toos ah balse aad dhex joogto deegaanka oo aad jeceshahay inaad isku diiwaangeliso bukaan ahaan. Waxaad isticmaali kartaa cinwaan guri ku meel gaar ah, kaas oo noqon kara cinwaanka saaxiibkaa ama xarun daryeel, ama xafiiska ayaa ku diiwaangelin kara cinwaan la'aan.

Waa inaad xaqiijiso in GP-ga uu kaala soo xiriiri karo taleefonka haddii uu u baahdo (tusaale ahaan, natiijooyinka baaritaanada).

## Haddii aad dhex degan tahay hooy loogu talagalay dadka magangelyo doonkaa ah

Haddii aad tahay qof magangelyo doon ah oo ku sugan hoyga Xafiiska Arimaha Gudaha ama hooy ku meel gaar ah, sida hudheel, waa inaad isticmaasho cinwaanka hoygan markaad iska diiwaangelineyso GP oo aad sheegto inaad heysanin dukumiintiyada caddeeya cinwaanka sababta oo ah waxaad ku nooshahay hooy magangelyo doon oo uu bixiyay Xafiiska Arimaha Gudaha. Haddii uu diido GP inuu ku diiwaangeliyo, waa inaad la hadasho bixiyaha hooygaaga ama aad ka wacdo Hay'ada Migrant Help lambarka 0808 8010 503 (taleefon lambar bilaasha ah).

Haddii aad ogaato in Xafiiska Arimaha Gudaha uu doonayo inuu kuu wareejiyo hooy cusub, waa inaad u dib dhigin qaadashada tallaalka COVID-19 ilaa lagu raro. Waxaad ka qaadan kartaa kuurahaaga labaad ee tallaalka xarun tallaalka oo u dhaw hooygaaga cusub.

Waa inaad ilaashato kaarka yar ee laguugu siiyay ballantaada koowaad ee tallaalka oo aad u qaadata ballantaada labaad si xarunta tallaalka ay u xaqiijiso inaad hesho nooca tallaalka ee saxda ah.

## Qabsashada ballanta tallaalka

### England

Waxaad ku qabsan kartaa ballamaaga tallaalka onleeyn ahaan haddii mid kamid ah kuwan soo socda ay ku khuseeyaan:

- haddii aad jirto 55 sano ama ka weyn tahay
- haddii aad halis badan ugu jirto coronavirus (kuwa leh xaaladaha caafimaad ee raaga)
- haddii aad halista badan ugu jirto inaad dhibaatooyin kala kulanto caronavirus iyada oo ay ugu wacan tahay dhibaatooyin caafimaad oo horay u jiray (sida COPD, neefta, dhibaatooyinka wadnaha, cudurka kilyaha ama beerka, sonkorowga iyo dhibaatooyinka kale ee caafimaad ee muddada dheer)
- haddii aad tahay shaqaale caafimaad safka hore ku jira oo xaq u leh
- haddii aad tahay shaqaale bulsho safka hore ku jira oo xaq u leh
- haddii aad leedahay naafonimada waxbarashada
- haddii aad xaq u leedahay inaad hesho Gunnaada Dadka Daryeelka Bixiya

Waxaad ballan ka qabsan kartaa goob tallaalka oo wayn ama farmashiye bixiye tallaalka COVID-19. Uma baahnid inaad sugto inay NHS kula soo xiriiraan.

Waxaad ku qabsan kartaa ballantaada tallaalka COVID-19 onleeyn ahaan.

### Scotland

Waxaa lagu soo diri doonaa warqad casuumaad ah ama wicitaan taleefon oo laguugu siinayo faahfaahinta ballantaada. Haddii aad damacsan tahay inaad tagto ballanta, waxbo uma baahnid inaad sameyso si aad u xaqiijiso inaad u soo socoto ballanta. Waxaad dib u qorsheyn kartaa ama baajin kartaa ballantaada haddii aadan xaadiri karin si markaas ballantaada qof kale loo siiyo.

### Wales

Marka la joogo xilligaaga aad qaadan lahayd tallaalka, waxaa si toos ah kuula soo xiriir doona NHS. Waxaa lagaa soo wici karaa taleefoonka ama waxaa lagu soo diri kara warqad

## Miyaa lai wargelin doonaa Xafiiska Arimaha Gudaha haddii aan qaato tallaalka?

Xogtaada lalama wadaagi doono waaxda socdaalka ee Xafiiska Arimaha Gudaha marka aad hesho adeeg ay NHS bixiso oo bilaasha u ah qof walba, iyadoon loo eegin xaalada deganaanshaha. Tani waxaa kamid ah adeegyada GP iyo baaritaanka COVID-19, adeegyada daaweynta iyo tallaalka.

Waa inaan lagu weydiinin inaad caddeeyso xaaladaada deganaanshaha markaad iska diiwaangelineyso GP ama qabsaneyso ballanta tallaalka COVID-19.

Qaar kamid ah adeegyada isbitaalka iyo bulshada ee NHS ee aan la xiriirin baaritaanka, daaweynta ama tallaalka coronavirus bilaash uma ahan dadka aanan heysanin xaalada deganaanshaha ee rasmiga ah. Adeegyadan waxay la wadaagi karaan xogtaada, sida

magaca, cinwaanka iyo taariikhda dhalashada, waaxda socdaalka ee Xafiiska Arimaha Gudaha. Waxaa sidan loo sameeyaa in la xaqiijiyo xaaladaada deganaansho ee waqti xaadirkan ama in la gudbiyo lacagaha daryeelka caafimaadka ee aan la bixinin. Xogta ku saabsan caafimaadkaaga lama wadaagi doono.

Xaaladaha qaar haddii ay dhacdo in loo baqo badqabka shaqsiyaadka ama dadweynaha, adeegyada NHS waxaa looga baahan karaa inay xogta bukaanka la wadaagaan booliska, maxkamadaha iyo waaxyaha dowlada.

## **AMMAAN MA LEEYIHIIN TALLAALADA COVID-19?**

Tallaalada la ansixiyay in laga isticmaalo UK waxay buuxiyeen heerarka badqabka oo adag, tayada iyo waxtarka ay dejisay Medicines and Healthcare products Regulatory Agency (MHRA) (Wakaaladda Sharciyeynta alaabaha Daawooyinka iyo Daryeelka Caafimaadka).

Tallaal kasta oo coronavirus oo la ansixiyay waa inuu maro dhammaan tijaabooyinka caafimaad iyo hubinta badqabka ee ay maraan dhammaan daawooyinka kale ee shatiyeysan. MHRA waxay raacdaa heererka caalamiga ah ee badqabka.

Dhammaan tallaalada waxaa lagu tijaabiyay inta u dhaxeysa 15,000 ilaa iyo 50,000 oo qofood guud ahaan dunida oo dhan. Waxaa lagu tijaabiyay rag iyo dumar labaduba, dad ka kala socdo qowmiyado kala duwan, iyo dhamman da' kasta oo u dhaxeysa 18-84. Daraasadaha ayaa sii socon doona xitaa inta lagu guda jiro bixinta tallaalka si loo agaato waxtarka ay u leeyihiin kahortagga caabuqa ama qaadida fayraska laga yaabo in loo gudbiyo dadka kale, iyo si loo balaariyo isticmaalka loo isticmaalayo carruurta.

Ilaa hadda, malaayiin dad ah ayaa la siiyay tallaalka COVID-19 oo warbixinada waxyeelooyinka daawada ee xun, sida xasaasiyadaha, aad ayay u yaraayeen. Ma jiraan wax dhibaatooyinka muddada dheer ah oo la soo sheegay.

Si aad wax badan uga ogaatid tallaalada laga ansixiyay UK, eeg:

- [GOV.UK: Tallaalka Pfizer/BioNTech ee COVID-19 ee ay ansixisay MHRA \(Ingiriis kaliya\)](#)
- [GOV.UK: Tallaalka Oxford/AstraZeneca ee COVID-19 ee ay ansixisay MHRA \(Ingiriis kaliya\)](#)
- [GOV.UK: Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee ay ansixisay MHRA \(Ingiriis kaliya\)](#)

## **WAXTAR INTEE LA'EG AYUU LEEYAHYA TALLAALKA COVID-19?**

Kuuraha koowaad ee tallaal kasta oo COVID-19 waa inuu si wanaagsan kaaga ilaaliyaa coronavirus. Balse waxaad u baahan tahay inaad ka qaadato labo kuure tallaalka si uu kuu siiyo difaac raaga. Waxaa dhacda in wali uu kugu dhici karo ama aad gudbin karto coronavirus xitaa haddii aad qaadato tallaalka. Tani macnaheedu waa inay muhiim tahay:

- in la sii wado raacida [talooyinka kala fogaanshaha bulshada](#)

- in haddii aad awoodo, aad xirato wax dabooli kara sankaa iyo afkaaga marka aad joogto meelaha ay adag tahay inaad ka fogaato dadka kale.

## **WAXYEELOYINKA TALLAALKA COVID-19**

Inta badan waxyeelooyinka tallaalka COVID-19 way fudud yihiin waana inaysan sii socon wax ka badan 2-3 maalmood, sida:

- garabka oo ku xanuuna meesha cirbada lagu muday
- dareemida daal
- madax xanuun
- damqasho
- dareemida jiro ama jirashada
- heerkul ama qandho

Waxaad qaadan kartaa xanuun baabi'iyaal, sida paracetamol, haddii aad u baahato.

Haddi aad yeelato kuleel badan oo ku haya wax ka badan 48 saacadood waxaad lahaan kartaa coronavirus ama caabuq kale. Qufac iyo luminta urta ama dhadhanka ma ahan waxyeelooyinka tallaalka marka haddii aad isku aragto calaamadahan waa inaad diyaarsato baaritaan coronavirus onleyn ahaan.

Haddii calaamadahaaga ay ka sii daraan, ay sii jiraan wax ka badan 48 saacadood ama aad walwalsan tahay, wac GP-gaaga inta u dhaxeysa 8am iyo 6.30pm ama wac 111 xilliyada kale (kani waa lambar bilaash lagu waco). Waxaad ku heli kartaa turjubaanka luuqadaada inaad si isdaba joog ah uga jawaabto “**yes**” su'aalaha dhammaan.

## **Xasaasiyaddaha**

U sheeg shaqaalaha daryeelka caafimaadka ka hor inta aan lagu tallaalin haddii aad waligaa yeelatay xasaasiyad daran. Waa inaad qaadanin tallaalka COVID-19 haddii aad waligaa ku yeelatay xasaasiyad xun (ay kamid tahay xasaasiyada daran):

- kuure hore oo isla tallalka ah
- wax kamid ah waxyaabaha uu tallaalka ka sameysan yahay

Dareen-celinta xasaasiyadaha ee daran wey yartahay. Haddii aad xasaasiyad ku qabto tallaalka, waxaa la arkaa daqiiqado yar ka dib. Shaqaalaha iyo tabbarucayaasha jooga goobaha tallaalka waxaa lagu tababaray inay la tacaamulaan xasaasiyadaha oo ay daaweeyaan isla markaaba.

Waxaad soo wargelin kartaa waxyeelo kasta oo laga shakiyo adiga oo isticmaalaya [nidaamka badqabka Coronavirus ee Kaarka Jaalaha ah](#).

## **WAXYABAHA LAGA SAMEEYAY TALLAALKA COVID-19**

Tallaalada COVID-19 ee la ansixiyay kuma jiraan wax xoola laga keenay ama ukun.



Golaha Caafimaadka Islaamka ee British [wuxuu ku taliyay in tallaalka la qaadan karo](#). Kaniisada Katooliga ayaa sheegtay [in isticmaalka tallaalka COVID-19 ay tahay mid anshax ahaan la aqbali karo](#).

## **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Doctors of the World: [macluumaadka caafimaad ee la fasiray ee COVID-19](#)

British Red Cross (Hay'ada Laanqayrta Cas ee British): [Tallaalada COVID-19: waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato](#)

NHS England: [Tallaalka Coronavirus \(COVID-19\)](#)

NHS Inform: [Tallaalka coronavirus \(COVID-19\)](#)

Public Health Wales (Caafimaadka Fayadhowrka ee Wales): [Macluumaadka tallaalka COVID-19](#)